# Khiyaano

(Eventyr som handler en rev som skulle lure løve,hare,slange,bål og vann)

Bari baa waxaa jiri jiray xayawaan badan oo wada lahaa qaalin geel ah. Xayawaankaasi waxay kala ahaayeen Dawaco, Libaax, Mas, iyo Bakayle, iyo waliba waxaa kaloo la lahaa Dab iyo Biyo. Dawacadu waxay ahayd khiyaanoolay. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa waxaa dhacday dawacadii ayaa maskii ku tiri, "Waryaa Masow, libaaxu wuxuu rabaa in uu na wada cuno uu qaato qaalinta kaligiis; markaa orodoo soo dil." Markaa maskii sidii ayuu sameeyay. Haddana dawacadii waxay u tagtay dabkii, waxayna ku tiri, "Waryaahee, maskii wuxuu dilay libaaxii, haddana wuxuu rabaa in uu na wada dilo; markaa orodoo soo gub."Sidii ayuu sameeyay. Ka dib dabkii wuxuu ku dhacay biyihii, wuuna damay.
Aakhirkii waxaa isku soo haray dawacadii iyo bakaylihii.
Maalin maalmaha ka mid ah ayay waxay wada wateen qaalintii. Waxaana horay socday bakaylihii, gadaalna waxaa socday dawacadii. Qaalintii geela ahayd ayay dabada wax uga dhufatay. Waxay is tiri, "Qaalinta waxay harraantinaysaa bakaylaha," laakiin iyadii ayay harraantisay. Sidii ayay ku dhimatay. Halka waxaa qaalintii ku qaatay bakaylihii.

**<u>Layli:</u>**

Ka jawaab suaalahan.

1. Xayawaanku maxay wada lahaayeen?
2. Dacawado maxay ku tidhi Maska?
3. maxay ku tidhi dacawado dabka?
4.Yaa hashii u hadhay?



Foto: Alexas_Fotos / Pixabay

# HESHIIS DARRO

Eventyret handler om to katter som stelte kjøtt, men kunne ikke vare enige om delingen. Til slutt bestemte de å gå til en ape slik at han kan dele den likt. Apen lurte dem slik at han spiste kjøttet for seg selv.

Sheekadani waxay ku saabsantahay lab bisadood oo guri udhacay, kana soo
Xaday hilib. Hilbkii si ay u qaybsadaan ayey ku heshiinwaayeen oo isku dileen. Kadib waxay iskula tageen daayeer si uu si cadaalad ah ugu qaybiyo. Laakiin wax la,aan baa ka raacday. Laba bisadood baa habeen isa soo rsacay, guri bay u dhaceen oo ay hilib ka xadeen. Markii ay dibadda ula soo baxeen,ayey mid waliba doontay in ay ta kale ka qayb badsato. Halkii bay isku laayeen, wajiga ayey iska diirtecn. Qaddar markii ay is xagxaganayeen ayay midi tii kale ku tiri: «Naa waatanoo waa isku dhimanaye aynu garsoore isula tagno, hilibka ha inoo kala qaybshee"Bisaddii kalena taladaa ayay yeeshay.Waxay u yimaadeen daayeer. Hilibkii bay hordhigeen, in uu si sinnaan ah ugu qaybiyo ayay weydiisteen. Daayeerkii mindi iyo miisaan buu soo qaatay. Hilibkii buu laba u qaybshay. Qaybba kafad buu saaray. Kolba dhinaca cuslaada ayuu in weyn ka jaraa oo uu cantuugaa ilaa uu hilibkii sidaas ku laastay. Markaasuu labadii bisadood ku yiri: «Sidaas baan midkiina qayb dheeraad ahi ku raacin». Markaasay labadii bisadood caro iyo ciil ugn baxday. Wexay sameeyaanna garan waayeen.
Mid baa tii kale ku tiri: «Bal haddaynu markii innagu qunyar
ku heshiin lahayn, waxaasi oo khasaare ahi inam
qabsadeen». Markaasay tii kale tiri «waa runtaaa».

**<u>LAYLIS</u>**:

Weydiino

1. Bisaduhu xagee bay u dhaceen?

2.. Maxay isku dileen?

3. Daayeerkii sidee buu hilibkii ugu kala qaybiyey?

4. Maxay bisaduhu ka caroodeen?

5. Bisadda immisa magac oo kalc ayaa loo yaqaan?


Foto: 165106 / Pixabay

# Dacawo iyo Waraabe

(Et eventyr med spørsmål, som handler om en rev og en hyene)

Bari ayaa dawaco adhi fara badan ka cuni jirtay reero meel deggan. Adhigaas oo riyo iyo idaba lahaa. Maalin danbe ayaa dadkii meel isugu yimaadeen waxaaney ka wada hadleen sidii ay dawacadaa dhibta badan iskaga dili lahaayeen. Waxay dadkii talo ku gaadheen in dabin loo dhigo dawacada. Dawacadii waxay ku dhacday dabinkii loo dhigay. Dadkii waxay ku xidheen dawacadii geed jiridiis, si looga aarsado oo waxaa talo lagu gaadhey in dab lagu dhex rido. Dadkii waxay soo gureen qoryo xaabo ah oo aad u badan. Waxay xaabadii ka buuxsheen god aad u weyn oo ay ka qodeen geedkii ay dawacadu ku xidhnayd agtiisa. Markaas ayey xaabadii dab ku huriyeen waxayna yidhaahdeen, "Aan iska tagno, oo marka dabku uu aad u shidmo ku soo noqonno oo dawacada ku dhex ridno." Waraabe aad u gaajaysan ayaa wuxuu maqlay cidii dawacada. Markaas ayuu soo orday oo is yidhi, aad ka eryatid neefka ay dilootey maanta, waraabihii wuxuu u yimi dawacadii xidhneyd.
Intuu yaabey ayuu ku yidhi, "Naa dawaco yaa geedka kugu xidh-xidhay?" Markaas ayey dawacadii tidhi, "Waxa igu xidhay adeerkay." Waraabihii (Dhurwaa) ayaa hadana yidhi, "Oo muxuu kuu xidhay?" Dawacadii ayaa tidhi, "Adeerkay aad buu ii jicelyahay." Wuxuu arkay in aan caato ahay markaa wuxuu ii qalay wan weyn oo aad u buuran. Dabkaasna wankaas ayaa lagu karin doonaa. Aniguna waan diidanahay in aan cuno wankaas buuran, waayo gaajo ima hayso oo maalmahan oo dhan ayaan hilib cunayey, oo waxaan ka cabsanayaa inaan calool

xanuun ka qaado. Markii aan damcay in aan ka tagana, intuu i soo qabtay ayuu geedkan igu xidhay. Markaan hilibkii cuni kari waayeyna wuu i diley.

Waraabihii ayaa intuu afka aad u kala qabtay illeen waa wax hilib iyo baruur jecele yidhi, "Ihi! ihi! ihi! aniga ayaa xariga kaa furaya ee aniga geedka igu xidh, si aan anigu u cuno hilibkaas adiguna uga nabad gasho." Markii dadkii ku soo noqdeen meeshii dawacadu ku xidhnayd, si ay dabka ugu dhex tuuraan, waxay u yimaaddeen waraabe ku xidhan geedkii. Dadkii ayaa intey yaabeen yidhi, "War Waraabe meeday dawacadii?" Markaas ayuu waraabihii yidhi, "aniga ayaa xarigii ka furay oo way tagtay."

Dadkii ayaa yidhi, "Oo maxaad uga furtay?" Waraabihii wuxuu yidhi, "waxay i tidhi dawacadii aniga gaajo ima hayso, ee hilibka la ii keeni lahaa adigu cun." Markaas ayey dadkii isagii dabkii ku tuureen. Sidaas ayaa waraabihii isku darsaday hunguri xumada iyo doqonnimada ku dhintay.

**<u>Layli:</u>**

1. Dacawado maxay reera ka cuni jirtey?
2. Maxay dadku ka tashanayeen?
3. Maxay dadku soo gureen?
4. Waraabahu muxuu rabay markuu dawacad u yimid?
5. Maxay dawacado ku tidhi waraabaha?
6. Muxuu waraabuhu u waydiistay dawacad in isaga ay geedka ku xidho?
7. Dadkii markii ay ku soo noqdeen geedkii ay ku xidheen dacawada maxay ugu yimaadeen?
8. Waraabihii maxaa lagu sameeyay?



Foto: h_anatole0/ Pixabay

# Akhbaarta dahsoon

(en fortelling om en hemmelig beskjed)

Bari baa waxa jirey oday reer miyi ah. Waxaa uu dhalay wiil uu aad u jeclaa. Waxa uu goàansaday in uu u diro wiilkiisa dugsi ku yaalay magaalo aad uga fog halka uu deganyahay.

Nolasha magaaladuna aad bay uga duwanayd tii guriga, inankiina aad iyo aad bay ugu adkayd inuu la qabsado. Inankii markii uu muddo dugsigii dhiganayay ayuu la kulmay niman safar ah oo ka yimid halkii aabihii deganaa, markaasuu inankii aabihii fariin u faray nimankii safarka ahaa. Waxaa uu ku yidhi: "Aabahay u sheega in aan shanta wakhti hal weyso ku tukado."

Aabihii markuu helay fariintii wuu fahmay in inankiisu in uu maalintii hal mar wax cuno oo uu rabo in cunto loo soo diro.

Odaygii wuxuu raadiyey cid tegeysa magaalada oo uu inankiisa cunto ugu dhiibo. Dhowr cisho ka dib waxa uu helay nin safar ah oo magaalada tegayaa, waxaanu u dhiibay soddon(30) wasladood oo hilib ah iyo joog subag ah. Waxaanu ku yiri dhambaalwadahii, "U gee cuntadaas inankaygii una sheeg inankayga in bishu ay soddon maalmood tahay, baliguna buuxo."Dhambaalwadahii wuxuu balan qaaday in uu cuntada iyo dhambaalkaba uu u gayn doono wiilka, inkastoo uuna fahmin fariinta dahsoon.

Intii uu jidka sii socday dhambaalwadihi ayuu gaajooday, markaasuu waxoogaa hilib iyo subag ah isku cunay.Markii uu gaaray meeshii uu u socday waxa uu wiilkii ku wareejiyey cuntadii iyo fariintii oo aabihii ugu soo dhiibay.

Inankii markuu gudoomay cuntadii iyo fariintii ayuu furay cuntadii,markaasu u sheegay dhambaalwadihii in cuntada badh maqanyahay. Inta uu naxay dhambaalwadihi ayuu inankii waydiiyey sida uu ku ogaaday in ini maqantahay.

Inankii wuxuu ugu jawaabay, "Aabahay ayaa iigu sheegay fariintii uu ku soo faray".

Taas oo ahayd bishu waa soddon(30)maalmood oo macnaheedu ahaa hilibku waa sodon wasladood, baliguna wuu buuxaa oo micnaheedu ahaa subagu wuu buuxaa.

**Ka jawaab suàalahan:**

1. Muxuu aabuhu wiilkiisa ugu diray magaalada?
2. Cunto intee leeg ayuu aabuhu u diray wiilkiisa?
3. Maxaa ay ahayd farriinta uu aabuhu u diray wiilkiisa?
4. Maxaa aad u malaynaysaa sababta farriinsidahu uu u xaday cuntada?



Illustrasjon: CDD20/ Pixabay

# Cuqubo waalid

waqtigu cawaysin buu ahaa sanqadhuna way gòday waxaan ahayn caleemaha jababaxdooda markii ay laydhu marto.

Faarax markaa waxa uu kasoo laabtay socdaal gaaban oo uu markaa meel aan sidaa ufogayn ku gaadhay.

Nin aad u da'weyn buu ahaa adkaysina u lahayn xanuun nocnaba ha ahaato e. inta markiiba la daday ayaa dab loo shiday dawo iyo quraana lagula daalay.

Beryo hadii la baantay oo uu bogsaday indhihii ayaa aragii laga qaaday. Sidaa darted sidaa buu odaygii u laasimay guriga markii uu meel u baahdo taasina ay yaraydba waxaa hagi jiray

inan uu dhalay. Inanku aad buu u necbaan jiray howshaa in badana waxa uu isku dayay inuu ka leexleexdo.Marar kale wuxuu iku dayey in uu odayga lugooyo, dhibaateeyo, xumaato badana wuu kula kacay si looga daayo hagida.Hase ahaatee way u suurtoobi wayday oo cid looga bedelaaba ma jirin sidaa darteed baa isaga oo maalin hagaya odayga meel cidla ahna ay socdaan ayuu damcay in uu fuliyo wax beryahaaba maskaxdiisa ku wareegayey.

''Eeyaa aabe ayuu ugu ''yeedhay

"Hee" buu odaygiina u ceshay

Geedkan hoostiisa iska sii fadhi aan dundumada koro oo bal aan eego halka aynu ku beeganahay e ayuu "inankii yidhi".

"Aabe ha iga raagin" odaygii baa kasii daba geeyey.

Sidii buu inankii duurkiisa u xulay .Inta uu aabihii cidla kaga dhaqaaqay baa bahalana odayii bartaa ku cuneen markii habeenkii dumayba.

Inankii markii uu waynaaday buu guursaday. Wax ubad ah inan keliya buu dhalay. Hadii wiilkii xooga leekaday ninkii baa indho belay. Markaas baa tabtuu abbihii ku ahaa wiilkkiina ku noqday.

Beri danbe ayuu aabihii wiilkii ku yidhi iyaga oo maraya meel cidla ah aabo geedka hosstiisa iska sii fadhi anigu dundumo aan karo oo bal aan eego meesha reerkii inaga xige e . Odaygii waxa uu xasuustay in ay meeshu tahay bartii uu waagii abbihii kaga tegay. Hadiii u sidaas wax u eeg eegay ayuu ku dhawaaqay waar kolay I soo noqon mayside orod oo iska tag.

**Layli:**

1. Cuqubada waalidku waa halis. Faallee.
2. Ninku muxuu eegeegay markuu wiilkiisii hadhka fadhiisiyey?
3. Dulucda sheekadu waa maxay?
4. Muxuu ku ogaaday in aanu wiilkiisu ku soo noqonayn odaygu?



Foto: rawpixel.com /AdobeStock

# Geedi iyo hashiisi (sheeko)

Geedi wuxuu lahaa hal ’’baarcad’’ la odhan jiray oo loogu xudun xidhay.

Wiilku hashiisa aad buu u jeclaa had iyo jeerna wuu u geeda guri jiray. Iyaduna mark ay indhaha ku qabato ayay usoo ololi jirtay , oo u imaan jirtay. Maka ay u timaado wuxuu had iy goor afka u geliyaa xagal caws ah oo uu soo guray.

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa geddi oo nin karti badan ahaa aabihii dhaan u dhiibay. Maalintaas geeddi waxaa raacay wiil kuray ahaa oo ay geddi walaala ahaayeen.

Baarcad markii ay geedi tawday bay olol af-labadii awatay daaqna ka soontay.

Wuxuu maalintii oo dhan weeteeyoba goor duhurkii ah buu wiilkii is yidhi gurigii u biyo doono.

Intii aanu ka libdhinba intay cagaha laabatay bay duurka xushay. Wiilkii markii u bar-cad tabay baadi-doon dhowna kusoo waayey ayuu geeli intii kale caraabiyey.

Markiiba Geedi iyo aabaahi waxay ka warheleen in ay barcad maqan tahay. Waxayna waysada u biyaysteen baadi doon horleh. Ilaa iyo caways danbe markii ay goobayeen bay fara madhan la soo noqdeen. Aroortii danbe ayay haddana raacdo cusboonaysiiyeen waxay doon doonaanba goor barqo ah ahayd bay raqdii hasha isa soo dultaageen.

Hareeraha inta ay u raad gooyeen bay libaaxii baruurteeda dharqaday raadkiisii arkeen.

Ilaahay waxaan ugu nidar-galnay in aynaan libaaxyahow ifka kuwada noolaan ayuu intuu qamuunyaystay yidhi waar inakeen naftaada ha halgine, baarcad kuu soo noqon maysee ayuu aabihii intuu dhaqaaqay Geedi ku yidhi.

Geedi markii gurigii yimi u caano ku dhamay ayuu warankiisii degta u riday oo aabihii oo aan arkeen goobtii baarcad tiil ku toosay. Geed raqda u dhowaa buuna dhalada ugu baxay, si uu ninkii baarcad dilay halkii uu hashiisa dhigay ugu sugo.

Libaaxii wuxuu laqanyadii hadh subaxeedkii la jiifoba duhur mar ay ahayd buu sooo rakaad doontay raqdii goortuu jilbaha dhigay ayuu Geedii intuu soo gaaday warankiisii kala bogtey oo kellida midig intuu kaga hubsaday tan bidix ka mudhmudiyey .Libaaxii inta uu booday buu laba talaabo markii u qaaday afweynta goostay. Geedi ayuu libaaxii oo naf la caarigii la soo jeestay oo afka kala waaxay dalqada ugu shalwiyey.

Libaaxii markii uu naf-baxay ayuu saantiiisi oo uu madaxi ku jiro  degta u soo ritay oo gurigoodii kula soo dheelmaday. Ayaamo yar markii laga joogey ayuu nin gaala oo degmada socdaal ku marayey saantii geedi haystay ka war helay. Geedi saantii waxaa laga siistey lacag uu qaalin geel ah oo hashiisi u magdhowday siistay.

Qaalintii markii ay curatay waxay la magic baxday maandeeq.

**Laylis:**

1. Siddeebuu Geedi hasha Baarcad markii hore u yeeshay?
2. Muxuu hasha ugu geeda guri jirey?
3. Maxay Baarcad markay Geedi aragto ugu soo ololi jirtay?
4. Maxay hashu geela uga tagtay?
5. Xaguu Geedi ku maqnaa markay hashiisu lontay?
6. Sidee buu Geedi nidarkiisii u oofiyey?
7. Sheeg laba guulood oo uu Geedi dilkii libaaxa ka gaadhay?
8. Xagee buu ridadii labaad libaaxa kala helay?



Foto: Roaming_Revolution/ Pixabay

# Cigaal iyo kurtin (Et eventyr med spørsmål)

Cigaal Shiidaad oo habeen guureynaya ayaa wuxuu ku soo baxey kurtin (geed lagooyey) oo bahal u eg. Cigaal ayaa istaagey oo yidhi wallee waa libaax waxan ku hortaagan. Halkii buu difaac ka galey isgoo kurtinkii iska eegaya inuu ku soo boodo. Waxba yaan sheekada ku dheereyne cadceedii ayaa sidii ugu soo baxday oo waagii baa baryay beryey isaga oo hortaagan kurtinkii. Markii uu xaqiiq sadey inuu yahey waxa uu hortaaganyahay kurtinee uu xaley oo dhan hor fadhiyey oo aanu aheyn bahal, ayuu yidhi 'Ma waxaan ku moodey mise waxaad noqotey, mise waxaan loo noqon doonin. Waxaan ku moodey bahal waxaase noqotey kurtin waxaanse loo noqon doonin guure habeen oo dambe.

**Layli:**

1.Kurtin waa maxay?

2. Cigaal muxuu ka baqay?

3.Muxuu Cigaal habeenkii oo dhan meesha u taagnaa?

4.Markii waagu baryey muxuu yidhi Cigaal?